# OGEYSIISKA DHAQAMADA ASTURNAANTA

**OGEYSIISKAAN WUXUU SHARAXAA SIDA LOO ISTICMAALI KARO LOONA BIXIN KARO MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA ADIGA KUGU SAABSAN. WUXUU KALOO SHARAXAA SIDA AAD ADIGA U HELI KARTID MACLUUMAADKAAN. FADLAN SI TAXADIR LEH U FIIRI.**

Neighborcare Health (Caafimaadka Dareyeelka Xaafadda) waxay dhowrtaa asturnaantaada. Waxaan fahamsanahay in macluumaadka caafimaadka shakhsiga ee adiga kugu saabsan in uu yahay xasaasi. Dad kale lama siin doono macluumaadkaada haddii adiga aadan noo sheegin, ama haddii sharciga uusan noo ogolaanin ama naga dalbanin in aan sidaas sameyno.

Sharciga wuxuu naga rabaa in aan si gaar ah u xajino Macluumaadkaada Caafimaadka la Badbaadiyo (Protected Health Information) (PHI), ku siino Ogeysiiskaan, iyo in aan raacno qodobada Ogeysiiskaan. Waxaan kaloo xaq u leenahay in aan baddalno dhaqankena. Haddii aan wax ka baddalno Ogeysiiskaan, waxaad heli doontaa Ogeysiiska ugu dambeeyo marka xiga ee aad na soo booqatid. Haddii aan baddalno Ogeysiiskaan, waxaan ogeysiiska la baddalay ku soo dhajin doonaa meesha lagu suggo xafiiskena iyo boggena internetka neighborcare.org.

PHI waa macluumaad kasta oo laga helo macluumaadkaada shakhsiga, iyo macluumaadka caafimaadka iyo bii lasha. Si aad u heshid macluumaad badan oo ku saabsan dhaqanka asturan, ama si aad u heshid koobiyo dheeraad ah oo ku saabsan Ogeysiiskaan, fadlan nala soo xariir adiga oo istcmaala macluumaadka ku qoran dhamaadka Ogeysiiskaan.

## I. ISTICMAALKA IYO SII DEYNTA MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA LA BADBAADIYO

**A. Marka Aan La Haysanin Ogolaashadaada Qoran.** Waxaan xaq u leenahay in aan isticmaalno iyo in aan dhinac kale la wadaagno macluumaadkaada caafimaadka, asbaabta soo socota awgeed:

1. **Daweynta:** Waxaa dhici karto in macluumaadka ay helaan kalkaaliyaha, takhtarka, ama xubnaha kale ka tirsan kooxdena daryeelka caafimaadka, ee ku jira diiwaankaada caafimaadka, la isticmaalo si go'aan looga gaaro daryeelkaada mustaqbalka. Waxaan kaloo macluumaad la wadaagi karnaa dadka kale ee bixiya daryeelkaada. Tan waxay iyaga ku kaalmeysaa in ay xogogaal u noqdaan daryeelkaada.
2. **Lacag Bixinta:** Waxaan bixinta lacagta ka dalbanaa qorshaha ceymiska caafimaadkaada. Qorshooyinka caafimaadka waxay nooga baahan yahiin macluumaadka caafimaadka ee ku saabsan daryeelkaada caafimaadka. Macluumaadka lala qeybsado qorshooyinka caafimaadka waxaa ku jiri kara baarista, hawlaha laga qabto bukaanka, ama daryeelka lagu talliyo mustaqbalka.
3. **Hawlaha Daryeelka Caafimaadka:** Waxaa dhici karto in aan isticmaalno PHI iyo in aan wadaagno si aan u fullino hawlahena daryeelka caafimaadka, sida hawlaha hagaajinta tayada, barnaamijyada tababarka, aqoonsiga, shatti bixinta a ma hawlaha aqoonsiga. Tusaale ahaan, waxaa dhici in aan isticmaalno PHI si aan u fiirino daweyntena iyo adeegyada si loo qiimeeyo shaqada ay qabtaan shaqaalahena.
4. **Sida Sharciga Rabo ama Ogol Yahay:** Waxaa dhici karto in aan wadaagno PHI marka sharciga uu sidaas naga rabo ama noo ogol yahay. Tusaale ahaan, waxaa dhici karto in aan madaxda ku habboon siino PHI haddii aan aaminsanahay, in sida suurtogalka ah, in adiga aad tahay dhibbane lagu xadgudbay, la dayacay, ama loo geystay dagaalka guriga. Waxaa kaloo dh ici karta in aan wadaagno PHI, marka ay lagama maarmaan tahay, marka caaffimaadkaada, ama ammaankaada, ku sugan yahay halis culus. Sii deynta kale waxaa ka mid noqon kara: hawlaha caafimaadka dadweynaha; codsiyada wakaaladaha gobolka ama federaalka ; hirgelinta sharciga; ammanka maxkammadda ama hawlo kale uu sharciga ogol yahay; sheegashada magta shaqaalaha; wakaaladaha ciidamada ama ammaanka qaranka; takhatiirta raadisa sababta dhimashada, baareyaasha caafimaadka, iyo hay'adaha dhaqan celinta .

**B. Haddii Aan Ogolaasho Lagaa Haysanin, Waad Diidi Kartaa.**

1. **Qaaraanka:** Waxaa dhici karto in aan isticmaalno PHI si aan kuula soo xariirno, anaga oo ku dadaali doono in aan lacag u aruurino hawlahena. Waxaa kaloo dhici karta in aan PHI siino mu'asasa nala xariirta si ay mu'asasada kuula soo xariirto adiga si loogu aruuriyo lacag ay ku bixiso hawlaheeda. Xariirin kasta oo lagula soo yeesho adiga lana xariirta qaaraanka waxaa ku jiri doono sharaxaad ku saabsan sida aad uga bixi kartid xariirka qaaraanka ee lagula soo yeesho.
2. **Qoyska iyo Dadka Kale ee Ku Lug Leh Daryeelkaada.** Haddii aadan diidin, waxaa dhici karto in aan PHI la wadaagno xubin ka tirsan qoyska, qaraabo, saaxiib, ama qof kale aad adiga ku tilmaantid in uu ku lug leeyahay daryeelkaada caafimaadka. Waxaa dhici karta in aan wadaagno macluumaad si aan qofka u ogeysiino meesha aad ku sugan tahay, xaaladaada guud ama lacag bixinta la xariirta daryeelkaada.

3. **Dadaalka Daryeelka Musiibada.** Waxaa dhici karto in aan PHI aan la wadaagno hay'ad ka tirsan hay'adaha dadweynaha ama hay'ad gaar ah uu sharciga ama dastuurkeeda u fasaxay in ay kaalmeyso dadaalka daryeelka musiibada si leysugu duwo sida xubnaha qoyska loo ogeysiiyo meesha aad ku sugan tahay, xaaladaada guud, ama dhimasho.

**C. Waxaa Loo Baahan Yahay Ogolaashadaada Qoran.**

1. **Qoraalka Daweynta Madaxa.** Waa in aan adiga kaa helno ruqsad si aan u isticmaalno qoraalka daweynta madaxa, haddii qoraalka daweynta madaxa:
   (1) Uusan soo qorin qofka qoray xasuus qorka daweynta madaxa, looguna talo galay daweynta,
   (2) Aan loogu talogelin barnaamijyadena tababarka, halkaas ay ardayda caafimaadka madaxa, tababareyaasha ama takhatiirta bartaan horumarinta aqoontooda la tallinta,
   (3) Aan loo isticmaalin in aan ku difaacno naftena haddii aad naga dacweysid sharciga,
   (4) Aan la siinin wakaaladda kormeerka caafimaadka si ay u kormeerto qofka sameyay xasuus qorka daweynta madax,
   (5) Aan la siinin baaraha dhimashada ama baaraha caafimaadka; ama
   (6) Aan loo adeegsanin ka hortagga ama yareynta halis culus oo ku soo wajahan caafimaadka ama ammaanka qof ama dadweynaha guud.

2. **Ilamaha.** Waxaan raaci doonaa sharciga Gobolka Washington marka aan isticmaaleyno ama marka aan PHI la qeybsaneyno ilmaha. Ilamaha qaata adeegyada daryeelka caafimaadka ee la xariira HIV/AIDS; STD, daweynta caafimaadka madaxa, baarista qamrada/mukhadaraadka, iyo daweynta ama caafimaadka dhalmada waxay codsan karaan in qof kale oo iyaga mattalo in uu qaado macluumaadkaas. Haddii cunugga uusaan qofna siinin ruqsad qoran, waxaan macluumaadka siin doonaa oo keliya cunugga.

3. **Xariirka Suuq Geynta:** Iibinta PHI. Waa in aan haysano ruqsadaada qoran ka hor inta aan isticmaalin ama cidna la wadaagin PHI si loo suuq geeyo ama loo iibiyo PHI, sida waafaqsan sifeynta la xariirta iyo ka-dhaafidda ku qoran HIPAA.

**Isticmaalka Kale iyo Bixinta.** Codsiyada lagu raadinaayo macluumaadka marka laga reebo kuwa ku sifeysan Ogeysiiskaan waxay u baahan doonaan ruqsadaada qoran. Tusaale ahaan, waxaad u baahan tahay in aad qortid foomka ruqsadda ka hor inta aadan PHI u dirin shirkadda ceymiska nafta ama qareenkaada. Waad la noqon kartaa ruqsadaada waqti kasta marka aad na siisid codsi qoran.

## II. XUQUUQDA KUU GAARKA AH

**A. Xaqa Lagu Baaro Loogana Sameeyo Koobi.** Waxaad codsan kartaa in aad aragtid diiwaankaada caafimaadka, diiwaankaada biilasha si aad u baartid iyo/ama u codsatid koobiyada diiwaanka. Dhamaan codsiyada lagu fiiriyo diiwaanka waa in la soo qoro. Sida hoos timaado xaaladaha qaar, waxaa dhici karto in aan diidno in la helo diiwaankaada. Waxaa dhici karto in a an kugu soo dallacno khidmadda samaynta koobiyada iyo dirista diiwaanka.

**B. Xaqa Loo Leeyahay Xariir Kale.** Waxaad qoraal ahaan ku soo codsan kartaa in PHI laguugu soo diro hab kale ama in laguugu soo diro meel kale.

**C. Xaqa Lagu Codsado Xaddidaadda.** Waxaad xaq u leedahay in aad xaddidaad u sameysid PHI aan isticmaalno ama wadaagno xagga daweynta, lacag bixinta, ama hawlaha daryeelka caafimaadka. Waa in aad qoraal ku soo codsatid xaddidaadda una soo diritid Sarkaalka Asturnaanta HIPAA. Looma baahna in aan kugu waafaqno xadidaadda aad codsatay, haddii codsigaada uusan ahayn in la xaddido in PHI la siiyo qorshaha caafimaadka xagga lacag bixinta ama hawlaha daryeelka caafimaadka iyo in PHI si toos ah ula xariirto shay ka tirsan daryeelka caafimaadka ama adeeg aad adiga ama qof kale ama hay'ad kale kaa bixiyaan kharashka.

**D. Xaqa Loo Leeyahay Xisaabinta Bixinta.** Waxaad qoraal ahaan soo codsan kartaa xisaabinta bixinta PHI ee aan anaga sameyno lexdii sanno ee la soo dhaafay, taasoo hoos timaada xannibaadda iyo xaddidaadda qaar.

**E. Xaqa Lagu Dalbado Baddalaadda:** Waxaad xaq u leedahay in aad codsatid in aan baddalno PHI. Codsigaada waa in uu qoran yahay, iyo waa in uu sharaxo sababta loo baahan yahay in la baddalo macluuamaadka. Waxaa dhici karto in aan diidno codsigaada sida hoos timaado xaaladaha qaar.

**F. Xaqa Loo Leeyahay in la Helo Ogeysiis.** Waxaa dhici karto in aad xaq u yeelatid in aad heshid koobiga warqad ku saabsan Ogeysiiskaan marka aad codsi u gudbisid Sarkaalka Asturnaanta HIPAA, tel. 206-548-3045 waqti kasta.

**G. Xaqa Loo Leeyahay in la Helo Ogeysiis Marka La Jebiyo Sharciga.** Waxaa nalaga rabaa in aan ku ogeysiino haddii aan ogaano in la jebiyay PHI_ga aad leedahay ee aan la suggin, sida waafaqsan sharuudaha hoos yimaada federaalka.p

**H. Su'aalaha iyo Ashtakooyinka.** Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan asturnaantaada, ama aad ka walwalsan tahay in aan jebinay xuquuqdaada asturnaanta, waxaad la xaiiri kartaa Sarkaalka Asturnaanta HIPAA, tel. 206-548-3045. Waxaad kaloo ashtako qoran u gudbin kartaa Agaasimaha, Xafiiska Xuquuqda Madaniga (Office for Civil Rights) ee Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyadada Aadanaha Mareykanka (U.S. Department of Health and Human Services). Ma dhici doonto in aan kaa aargudano haddii aad ashtako u soo gudbisid Agaasimaha ama xafiiskena.

## III. TAARIIKHDA HIRGELINTA

**A. Taafiikhda Hirgelinta.** Ogeysiiskaan waxaa la hirgeli doonaa Sateembar 23, 2013.